

## Siyaasadda, Cilmibaadhista & Qiimaynta

/ Qaabdhismeedka iyo  
Tilmaamaha Ururinta Xogta  
**Qoomiyadeed oo la kala Jajabiyeey**  
xoojinta iyo caadiyeeynta ee ururinta xogta,  
falanqaynta iyo tabinta dadwayne ee  
qoomiyadda kusalaysan ee xogta ay kala  
jajabiyeen dawladda iyo hay'adaha.

/ Qaabdhismeedka Qiimaynta  
**Raadka La-dagaalanka Midab-takoorka**  
in si kahortag leh loo saadaaliyo meesha  
looga saaro eexda miyir la'aanta iyada oo  
la baadhayo sida kooxaha kala duwan ee  
Waddanka Loogu Yimi iyo kuwa la takooro  
ay u saamayn karaan barnaamiyada iyo  
siyaasadaha dawladda iyo hay'adaha.

## Joogtaynta & Isla-xisaabtanka

### / Sharciga La-Dagaalanka Midab-takoorka:

in la fududeeyo ballanqaadka socda ee  
dawladda ee la-dagaalanka midab-takoorka  
ee sharciga la soojeediyo, kaasi oo, haddii  
la ansixiyo, siinaya dawladda awood ay ku  
oggolaato isticmaalka ururka ee heerarka  
ururinta xogta qoomiyadda la xidhiidha  
iyo qaabdhismeedka qiimaynta raadka  
la-dagaalanka midab-takoorka. Sharciga  
la soojeediyo bixin doonaa hindisayaal la-  
dagaalanka midab-takoorka, bartirmaameedyo  
la cabbiri karo, tabin dadwayne iyo la-tasho  
bulsho, iyada oo loo marayo qorshayaasha  
xeeladeed ee sannaddada badan ee la  
cusboonaysiin karo.

### / Tabinta Dadwayne ee Horumarka:

in la muujiyo natijjooyinka socda ee "A Better  
Way Forward" lana wadaago casharrada la  
bartay.



## Waxbarashada & Wacyigalinta Dadwaynaha

### / Waxbarashada & Wacyigalinta Dadwaynaha ee Bartirmaameedsan

in hoos loo qodo faharka dadwaynaha ee  
qaabab badan oo takoor, oo ay kujiraan  
diiradsaarka ladagaalanka takoorka Madowga,  
ladagaalanka takoorka hayo Dadka Waddanka  
Loogu Yimi iyo yuhuud-nacaybka iyo  
Islaamnacaybka iyo qaababka kale ee takoorka  
ku aaddan kooxaha tilmaaman sida Siigga.

Kaqayb ahaan shaqadan, ururrada bulshadu  
waxay bilaabi inay sidii hore si dhaanta  
u fahmaan sababaha iyo raadka Islaam-  
nacaybka, waxay u soosaari waxbarasho  
dadwayne ardayda oo ay sahamin ururinta  
iyo daabacaadda dhacdooyinka la tabiyo ee  
Islaam-nacaybka.



## Iskaashiga Bulshada

### / Kooxda La-tashiga La-Dagaalanka Midab-takoorka ee Wasiirka

si loo fududeeyo wada-hadal socda oo laga  
la yeesho saaxiibada bulshada iyo wakiilada  
ganacsiga arrinta la-dagaalanka midab-  
takoorka iyo khibradda qaybta u gaarka ah  
iyo sidoo kale waayo-aragnimo toos ah, si loo  
taageero fulinta qorshaha.

### / Shirka La-Dagaalanka Midab-takoorka

in la isku keeno cilmibaadhayaasha, saaxiibada  
bulshada, khabiirrada iyo dejiyayaasha  
siyaasadda si la isku dhaafsado aqoon  
loona qiiimeeyo qalabka, xeeladaha iyo  
qaabdhismeedka la-dagaalanka midab-  
takoorka ee dawladda.



Hindisayaasha La-  
Dagaalanka Midab-  
takoorka Dadwaynaha  
U Gaarka ah

Maaraynta midab-takoorku gabi ahaan  
waa daruuri, laakiin hal cabbir wax kasta  
ma leekaysiin karno. Wawa daruuri ah inaan  
maaro u helno kala-tagnaanta kala-badsiga ee  
ay kujiraan bulshooyinka qaar.t

### / Xeeladda Takoorka Dadka Madow

in la xalliyo takoor Dadka Madow ee qaybo  
gaar ah, sida daryeekla ilmaha, waxbarashada  
iyo caddaaladda, iyada oo laga faa'idaysanayo  
hindisayaasha wasaaradda saaxiibka ah iyo iyada oo  
la dhigayo bartirmaameedyo la cabbiri karo kuwaasi  
oo si shaac ah loo tabin doono.

### / Xeeladda La-Dagaalanka Midab-takoorka ee Dadka Waddanka Loogu Yimi

in la soosaaro iyada oo la kaashanayo  
saaxiibada Dadka Waddanka Loogu Yimi  
bartimaameedsiga takoorka nidaamsan ee ay  
la kulmaan Dadka Waddanka Loogu Yimi, taasi  
oo muujinaysa ballanqaadka dawladda ee dib-  
u-heshiisiineed.

### / Xeeladda La-Dagaalanka Midab-takoorka ee Adeegga Dadwaynaha Ontario

in la kordhiyo wacyigalinta shaqaalaha iyo  
u-nuglaanta midab-takoorka nidaamsan, oo  
la kobciyo oo la meelmariyo agabka, Tabaha  
iyo bartirmaameedyada lagula dagaalamayo  
midab-takoorka gudaha OPS

A BETTER WAY FORWARD: QORSHAHAA 3-DA SANO EE XEELADEED  
EE LA-DAGAALANKA MIDAB-TAKOORKA EE ONTARIO wuxuu  
bartirmaameedsanayaa midab-takoorka nidaamsan ee siyaasadaha, go'aamada iyo  
barnaamijyada dawladda si qof kastaa u oofin karo wixii uu awoodo si buuxdana uga  
qaybqaato bulshada.

Midab-takoorka nidaamsan – oo ay kujiraan midab-takoorka Madowga, dadka  
waddanka loogu yimi, Islaam-nacaybka iyo midab-takoorka ay la kulmaan  
bulshooyinka kale ee la takooro - ayaa si aad ah u dhixgalay nolosheena maalinle iyo  
hay'adaha aan u doonano adeegyada dadwaynaha ee muhiimk ah. Waxay abuurtaa  
kala-fogaansho dheeraad ah oo u dhixeyya kan faa'idada qaba iyo kan dhibaataysan.  
Tani lama aqbali karo, waana inaynu beddelno sida aynu wax u wadno oo aynu  
burburino caqabadaha si aynu hore ugu kacno sinnaanta qoomiyadeed.

# A BETTER WAY FORWARD

Qorshaha 3-da sano  
ee Xeeladeed ee  
Ladagaalanka Midab-  
takoorka ee Ontario

A BETTER WAY FORWARD: QORSHAHAA 3-DA SANO EE XEELADEED EE LA-  
DAGAALANKA MIDAB-TAKOORKA EE ONTARIO waxa hoggaamin doona Agaasinka La-  
Dagaalanka Midab-takoorka Ontario. Macluumaa dheeraad ah, booqo:  
[ontario.ca/antiracism](http://ontario.ca/antiracism)



PHOTOGRAPHY HASNAIN DATTU

[Ontario.ca/antiracism](http://Ontario.ca/antiracism)